



Ref: XGGSH/670/B11/26: الرقم

Mogadishu, August 2, 2026: التاريخ

Ku: Xubnaha Xildhibaanada ee Hoose ku Xusan

Ujeeddo: Magacaabista Guddiga Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS,

Iyadoo la tixraacayo awoodaha iyo waajibaadka dastuuriga ah ee Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka ahna Guddoomiya ku-xigeen koowaad ee Golaha;

Markuu arkay Qodobka 87aad iyo Qodobka 88aad, faqraddiisa (1), xarafka (d) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

Markuu arkay Qodobka 2aad, faqraddiisa (4), iyo Qodobka 13aad, faqraddiisa (3), ee Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka BJFS;


Markuu tixgeliyey baahida loo qabo in la dhiso Guddi Doorasho oo maamula habsami-u-socodka Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka, si loo xaqiijiyo hufnaan, daahfurnaan iyo ku dhaqanka Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Golaha;

Markuu latashaday Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS.

Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka, ahna Guddoomiye Ku-xigeenka koowaad ee Golaha Shacabka, wuxuu magacaabayaa Guddiga Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS;

1. Xil. Abdirizak Omar Mohamed
2. Xil. Abdi Ibrahim Warsame (Qowdhan)
3. Xil. Jawahir Adawe Abdi
4. Xil. Abdullahi Hussein Ali (Abdalla)
5. Xil. Nur Ahmed Diriye
6. Xil. Mukhtar Mohamed Guled
7. Xil. Abdirahman Mohamed Sheikh
8. Xil. Khadra Mohamed Tukale
9. Xil. Abdikarim Mohamed Diriye

Waxaa la farayaa xubnaha kor ku xusan inay si degdeg ah u gutaan waajibaadka loo igmaday si waafaqsan Xeerhoosaadka Golaha.


Marwo. Sacdiya Yaasiin Xaaji Samatar
Guddoomiyaha KMG ee Golaha Shacabka BJFS

